# TUSAHA KA HORTAGGA

# FICILLADA

# XADGUDUBKA IYO HANJABAADDA

Gobolka Maine Laanta Xeer ilaalinta


Waxaa daabacay

XAFIISKA MAAMULKA MAXKAMADAHA

62 Elm Street
P.O.Box 4820
Portland, Maine 04112-4820

Soo saaridda 3aad - Daabacaadda 1aad

Luulyo, 2004

## Bogga Tusmada

I. MACLUUMAADKA GUUD ........................................................................................ 3

]II. QEEXID........................................................................................................ 4

III. SIDA QOFKA DACWADDA QABO UU ISKU DIFAACI KARO .......................... 5

A. Qofka wax dacweyn kara ........................................................................... 5
B. Qofka la dacweyn karo................................................................................ 6
C. Meesha ....................................................................................................... 6
D. Qarashka..................................................................................................... 6
E. Sida Dacwo loo xareeyo .............................................................................. 7
F. Caawimaadka la heli karo............................................................................ 8
G. Amarka Ilaalinta Ku meelgaar ka ah........................................................ 10
H. shaqada dacwada iyo warqadaha la xiriira............................................... 12
I. Hadii eedeeyuhu uu maskaxdiisa bedelo ................................................... 13
J. Dhageysiga ugu danbeeya ........................................................................ 13
K. Amar dhageysi .......................................................................................... 13
M. hadii eedeeyuhu uu doonayo in amarka la bur-buiryo ............................ 14
N. hadii uu eedeeyaha doonayo in loo kordhiyo........................................... 14

IV. SIDA EEDEYSANUHU UU ISKU DIFAACI KARO............................................ 14

A. Hadii amar ku meel gaar ah ...................................................................... 14
B. Dhageysiga kama danbeeysta ah.............................................................. 14
C. amar la bixiyay iyadoon qofna ogalaan..................................................... 15
E.hadii is difaachuhu uu doonayo in marka la bedelo ama la baabi'iyo:...................... 15
F. hadii eedeeyuhu uu doonayo inuu kordhisto amarka ilaalinta................................. 15

# I. MACLUUMAADKA GUUD

Sharciyada difaaca waxey awood u siiyaan dhibanayaasha isku guriga ah iney helaan badbaado degdeg ah iyo waliba mid waqti dheer jira doonta. Sharciyadaan waxaa kale oo ay awood u siiyaan shaqsiyaadka lagu soo eedeeyey sixun ula dhaqanka iyo qalqal galinta ama handadaadda iney is difaacaan ayna weydiistaan maxkamadda in labaddalo amarrada la faray amaba la baabi'iyo wax kasta oo lagu amray. Buuggan wuxuu caawinayaa dadka ku lug leh kiisaska kala badbaadinta dadka si markaas ey u fahmaan una isticmaalaan qaababka maxkamadeed oo loogu tala galay ayaga.

Waxaa jira laba nuuc oo ah kiisaska ilaalinta—mid wuxuu ku saabsan yahay cayda; ka kalena wuxuu ku saabsan yahay handadaad/qalqal galinta. Kiisaska looga hor taga cayda wey ka duwan yihiin kiisaska looga hortaga fara xumeynta inkastoo habab fara badan ey iskaga mid yihiin. Labada kiisba waa kuwo maxkamadda lagaga dacwoon karo hoosna imanaya xeerka Maine Revised Statutes, Magaca 19-A, qaybta 4001 ilaa qaybta 4011 (dhibka); Magaca 5, qaybaha 4651 ilaa 4660 iyo qaybta 4681 (fara xumaynta); iyo Magacda 17 iyo 17-A ( Xeerka Dambiga Maine). Sidaa darteed, nidaamyadan waa in loo isticmaala keliya marka maxkamadda soo fara gashitaan keeda uu noqdo lagama maar-maan si ey u nabad geliso shaqsi ama hanti si dhab ah u dhibaateysan.

Qaybta II ee buuggan waxuu micneynayaa waxa uu yahay dhibku "abuse"iyo waxa ey tahay fara xumayntu " harassment" ee hoos imanaya xeerarkan, iyo sida qodobyo kalaba loo qeexay. Si diirran u akhri qeybtani si aad u aragtid arrintaada iney la mid tahay waxyaabha inta looga hadlay.Qaybta III. Waxaa si gaar ah loogu qoray eedeeyaha ( kuwa ku doodaya in la caayay amaba la fara xumeyay) iyo Qaybta IV oo iyadana si gaar ah loogu qoray eedaysanaha (kuwa logu eedeeyay iney qof caayeen amaba fara xumeeyeen.). Haddi xaaladaada eynan u baahneny arrin maxkamadeed, waxaad kaloo gargaar weydiisan kartaa booliska gudaha ama qaybta loo yaqaan " Sherifka ee ka mid ah booliska) inay u diraan eedaysanaha digniin taasoo lamid ah tii horay ujirtay " damaanad nabad gelin" ee hoos imanaysa Xeerka Maine Revised Statutes, Magaca 17- A, qaybta 506-A. Haddii eedeeyaha rabo digniintan oo kale, karraaniga xafiisku ayaa haya xaashida. Haddii kale eedeeyaha waa inuu la xiriiro hay'adda hirgelinta xeerka ee degaan kiisa\keeda.

Dhammaan dhinacyada (dhibanayaasha iyo eedaysanayaasha) waa inay iska jiraan in qof kasta oo saxiixaya waraaqaha maxkamaddu inuu sheegayo sida ugu saxsan ee uu aqoon uleeyahay, war kahayo uuna rumaysan yahay eedaymaha ama war bixintu inay tahay wax uu qirsan yahay. Haddii qofkaasi wax been ah si ula kac ah u sheego maxkamadda dhegaysigeeda, wuxuu ka ahaan mas'uul wax kasto oo ah kharashkii maxkamadda, iyo kharashka afhayeenka qofka kale.

## II. QEEXID

Qeexid yadaan soo socdo waxey ku saabsan yihiin Sharciyada Badbaadada iyo hababka lagu muujiyay buuggan.

Xadgudub “abuse”: xadgudub waa hal fal ama kabadan oo dhax mara “ qoys ama dad guri isla wadaaga” ee sida hoos ku qoran.

1. Iskuday sababa dhaawac jirka gaara ama weerar gacan qaad ah;
2. Fara xumeyn;
3. Iskuday qofka loo muujiyo in wax loo geysan doono, loo hanjabo, amaba la qalqal geliyo.
4. In qof lagu qasbo inuu suubiyo waxyaabo uu xaq u leeyahay in uunan suubinin, ama lagu qasbo in uunan suubinin wax uu xaq u leeyahay inuu suubiyo.
5. In si weyn loogu adkeeyo qofka guuritaan ku saleysan sharci darro ayadoo,
    a) qofka laga bixiyo gurigiisa/geeda, ganacsi ama iskuul fasax la’aan ama si sharciyeysan.
    b) In qof loo raro meel fog, ama
    c) Lagu xadido meel.

6. Hanjabid qofka cabsi geliso taasoo qofka u muujisa in dambigaas lagali doono; ama
7. In sabab la’aan loo daba galo qofka ama la tago agagaarka gurigiisa, dugsiga, ganacsiga ama meesha uu ka shaqeeyo.

Qofweyn: Waa qofka jira 18 sano ama ka weyn, ka madax banaan cidkale.
Eedaysane: Eedaysanuhu waa qof lagu soo eedeeyay inuu dhibay ama fara xumeeyay dhibanaha.

Qofweyn: qofka 18 jir iyo kaweyn ah ama naftiisa ka mas’uul ah.

Eedeysane: Eedeysanaha waa qofka lagu soo oogay inuu si xun ula dhaqmay eedeeyaha ama uu ku xad gudbay.

Qoyska ama Xubnaha Guriga: Qoyska ama Xubnaha Gurigu waa dad iyagu is qaba iminka ama kuwa isqabi jiray; dadka ah waalid wada dhalay ilmaha; dadka wada nool iminka ama ku wada noolaan jiray hal qol ama la moodi jiray inay isqabaan; dadka iminka ama horeyba uga dhaxayn jirtay isku gal mood; dadka waa weyn ee ku wada nool hal guri iyo kuwa uu xiriir dhalasho ama guur ka dhexeeyo; ama ilmo yar yar oo ka mid ah xubnaha guriga marka uu yahay eedaysanuhu" qof weyn oo ka mid ah xubnaha guriga."

Handadaad/Faraxumayn: Handadaad/Faraxumayn macnaheedu waa sida soo socota:

1. saddex fal ama in ka badan oo daandaansi ah, hujuumid, gacan kahadal, u hanjabaad cad oo toos ah lidna ku ah qofkasta, qoys ama ganacsi, loogana jeedo cabsi gelin ama gardaraysi, ama xoolo burburin, iyo falalkaa oo run ahaantii cabsi gelin leh, daandaansi ama qasaaro hantida u geysan kara.

2. Falal saddex ah ama ka badan oo laga hor istaago qofka taasoo uu xaq u leeyahay inuu ku kifaaxo marka la fiiriyo xeerka xuquuqda dawlada dhexe iyo gobolka eey siisay shaqsiga.

3. Fal kaliya oo ah xoog la adeegsaday ama rabshad ama hanjabaad gacan ka hadal ah ama rabshad loogu tala galay in laga weeciyo si xor ah ugu dhaqanka wax kasta oo ka mid ah xeerka dawladda dhexe ama ka gobolka ama wixii kale ee xuquuq ah; ama loogu tala galay mamnuucidda midab takoorka ee hoos imanaaya xeerka dawladda dhexe ama gobolka.

4. Hal fal oo keeni kara dil, dil loo qasdo, gacansiin ama ku dhiiri gelin isdil, weerar, hanjabaad danbiile nimo, argagixin, fal xil kas la'aan ah, ku xad gudub jinsi, go'doomin mujrimnimo, go'doomin mujrinnimo oo ah dhinaca waalidka, fara xumeyn, ceebku kac, xadgudub, rabshad ah dhinaca shakhsiga qas danbiilenimo, marka loo eego Xeerarka 17 iyo 17-A kana mida Maine Revised Statutes( Xeerka Dambiilaha Maine).

5. Nooca falka lagu dhaqmay oo keeni kara khatar, iyada oo loo fiirinayo Xeerka Ciqaabta Maine, Qodobka 17-A qaybta 210, Maine Revised Statutes.

Ilma-yar: Waa qof kasta oo weli gaarin da'da 18, in la madax bannaaneyo maahee.

Dhinacyada: Eedeeyaha iyo eedeysanaha waa labada dhinac.

Eedeeyaha: Eedeeyaha waa qofka ka dacwoonaya in la dhibay; ama lafara xumeeyay ama qof ama ganacsiga ka cabani dhinaca xumeynta.

## III. SIDA QOFKA DACWADDA QABO UU ISKU DIFAACI KARO

A. Qofka wax dacweyn kara. Marka kiiska uu ku saabsan yahay sixun ula dhaqan ama xadgudub uu geystay ama ay geysatay xubin ka tirsan qoyska. Sida ku sharxan buug-yarahan, dadka hoos ku qorani wax way dacweyn karaan:

- Qof weyn oo naftiisa u hadlaya;
- Qof weyn oo matalaya ilmo yar uu mas'uul ka yahay;
- Qof yar oo madax banaan;
- Qof yar oo anan madax banaanayn, haddii ay metelayaan qof weyn oo waalid u ah ama mas'uul ka ah.

Marka kiiska uu ku saabsan yahay handadaad, sida ku qeexan buug-yarahan, dadka hoos ku qoran wax way dacweyn karaan:

- Qof weyn oo naftiisa u hadlaya;
- Qof weyn oo matalaya ilmo yar uu mas’uul ka yahay;
- Qof yar oo madax banaan;
- Qof yar oo anan madax banaanayn, haddii ay metelayaan qof weyn oo waalid u ah ama mas’uul ka ah.
- Qoys ama ganacsi.

B. Qofka la dacweyn karo. Marka kiiska uu ku saabsan yahay sixun ula dhaqan ama xadgudub. Sida ku sharxan buug-yarahan, dadka hoos ku qorani waa la dacweyn karaa:

1. Qof weyn ama ilmo madax banaan kaasoo:

- ay isqabaan ama isqabeen eedeeyaha;
- la nool ama la noolaa eedeeyaha sida inay isqabaan eedeeyaha oo kale;
- ah ilmaha runta ah ee eedeeyuhu dhalay; ah qaraabo isla dhashay imikana la nool eedeeyaha;
- kula nool ama kula noolaa eedeeyaha hal guri;
- ah ama ahaa mid galmood ka dhexeeyo asiga iyo eedeeyaha.

2. Qof yar oo aan madax banaaneyn, sida muddo dheer gacanta ugu hayay qof weyn oo waalida ama mas'uula, kaa soo:

- la nool ama la noolaa eedeeyaha sida inay isqabaan eedeeyaha oo kale;
- ah ilma runta ah ee eedeeyuhu dalia;
- ah qaraab isla dhashay imikana la nool eedeeyaha;
- ah ama ahaa midgalmood uu ka dhexeeyay eedeeyaha;
- kula nool ama kula noolaa eedeeyaha hal guri.

Kiiska ku saabsan handadidda ama cabsigalinta, sida u qeexan buug-yarahan, dadka hoos ku qoran waa la dacweyn karaa:

- qof weyn ama ilma madax banaan;
- ilmo aan madax banaaneyn, haddii ay metelayo waalid ama qof mas'uula;
- qoys ama ganacsi.

C**.** Meesha. Aad maxkamadda Degmada taas oo ku taal meesha eedeeyaha ama eedaysanuhu ku noolyihiin, ama haddii ay tahay in eedeeyuhu ka guuray meeshii uu deganaa si uu ugu fogaado dhib, aad Maxkamadda Degmada ee kutaal meesha cusub ee eedeeyuhu iminka deganyahay.

D. Qarashka. Ma jirto wax lacag ah oo lagaaga baahan yahay markaad fureysid kiiska ku saabsan si xun ula dhaqmid u dhaxeysa “qoyska xubnihiisa". Kiiska ku saabsan handadaadda waxa laga qaadi karaa $ 30.00, haddii aanu kiisku laxiriirin rabshad gudaha ah, fara xumayn jinsi ama xumo ku daba galid. Haddii eedeeyuhu awoodi karin qarashka $ 30.00 ah qofkani wuxuu ka codsan karaa karaaniga " Codsiga sii wadidida dacwadda

asaga oon wax lacag ah bixin". Wax lacag ah lagama qaado xaashadaha ama nuqullada waraaqaha ku waasoo loo soo gudbistay kiis Ilaalina dartiis.

E. Sida Dacwo loo xareeyo iyo Xaashadaha La Xirira. Waxa jira laba siyaabo oo loo helo loona buuxiyo dacwad taas oo ku bilaabmi talaabo ilaalina. Midda ugu horeysa waa inaad utagto xafiiska karaaniya ee kuyaal Maxkamadda Degmada, weyna qofka karaaniga ah wixii ku saabsan mid kamida ka ilaalinta dhib ama fara xumaynta wixii eed ku saabsan. Karraanigu wuxuu siin eedeeyaha arjiyada ku baboon eedaynta, ka soo eedeeyuhu ku soo buuxin karo maxkamadda dhex deeda ama mashruuca gudaha ee dhinaca rabshadaha, ama meel kasteba. Karraanigu wuxuu diyaar uyahay inuu ka jawaabo su'aalaha ku saabsan arjiga. Hase ahaatee, karraanigu xeer uma le talo ka siin dhinaca xeerka ah.

Midka labaad ee arji xeraynta waa inaad hesho arjiyada maxkamadda ee dhinaca shabakada balaaran ee caalamiga (World Wide Web) waa haddii aad kambuyuutar haysato iyo internet isku xidh, dejiso miisha laga galo mid kastoo ka mida shabakadahan soo socda: http://www. Mainebar. Org/forms.html http://www. Ptla.org/forms.html

Haddi aanad kambuyuutar haysan, waxaad aadaa maktabad meelahaa kaaga dhaw ama meeshii kale ee dad weynaha loogu talo galay kambuyuutarada weydiina qofka ka shaqeeya maktabadda inuu kaa caawiyo meelahaa arimahaa laga helo. Kambuyuutarku wuxuu ku weydiin doonaa su'aalo badan, ka dib halkaa ayaad ka helo doontaa arjiga dacwadda oo dhammays tiran iyo wixii kale ee arjiyo loobaahdo ah ku waas ood kadib soo daabacan karto, saxeex (intaad horjoogto bablik nootaariyada ama maxkamadda) kana xaree maxkamadda degmadaad

Labada kiis dhib ama fara xumaynta, waa in qofka dacwiyi cinwaan kiisa iyo aqoonsi giisa si kal soonile loo ilaaliyo haddi qofkaasi xareynayo war caddayn ah kuna saabsan in si kal ooni leh loogu ilaaliyo cinwaankiisa uu ku sheegay isaga oo dhaartay in sheegida warbixintaasi khatar ku tahay caafimaad kiisa, nabad gel yadiisa ama xuriyadda qofkaas ama ilmo. Arintaasi, xafiiska karraanigu waa inuu si kal soonile u ilaaliyo cinwaanka kaliyana wuxuu isticmaali karaa si uu ula xiriiro qofkaa. Maxkamadduna keliya waxay amri kartaa in arintaa la sheegu markay dhegaysatu kadib, iyo haddi maxkamadduu u aragto in laga maarmin in sidaa la yeelo caddaalad darteed.

Arinkaste oo la xiriirta ilaalin, kalsooni hanaoqoto ama yay noqon, eedeeyuhu waa inuu war geliyo xafiiska karraaniga wixii cinwaan is bedelay ee la xiriira xareynta dacwaddan.

Markaad buuxineyso arjiga dacwadda. Iska hubi inay wixii suura gala aad qeexdo xad gudbidda ama handadaadda. Haddii eedayntu ku saabsantahay xadgudub/sixun ula dhaqan, haku tiirsanaan hadalo gaaban sida " Eedaysanuhu si xun ayuu iila dhaqmay. "ama"Eedaysanuhu wuu ii hajabay". Balse ku dar eedayn cad sida: 20 Juun, ninkaygii hore John Doe wuxuu iga dharbaaxay wejiga. Ka dibna wuxuu iga laagay lugta taasoo keentay barar. Ama ku dar eedahaaga dhib ugeysiga ilma yar, eedaynta waa inay ku jirto magaca ilmaha iyo sida dacwada aad usoo gudbisay, guud ahaa ama gaar ahaan, adoo metelaya ilmaha.

Haddii dacwadu ku saabsan tahay fara xumayn, ha isku halayn kaliya hadalo gaaban sida: Eedaysanuhu wuu ikadeeday." Itaad ku dari lahayd." Saaxiibkay saaxiibadiisa cusub Mary Doe ayaa isoo wacday 40 jeer todobaadadii udanbeeyay." Haddii dacwadu ku saabsan tahay ama ay ku jirto eedayn ah ilmayar fara xumayn, dacwada waa inay aad ku darto magaca ilmaha iyo Gobolka dacwada aad ka soo gubisay, guud ahaan iyo qayb ahaanba, adoo metelaya ilmaha.

Haddi ilaalin degdega loo baahdo, akhri qaybta III(G) ee hoose," Amarka Ilaalinta Ku meelgaarka." Haddii Amarka Ilaalinta Ku meelgaarka degdeg loogu baahnayn, saxeex dacwada markaad horjoogto karraaniga, nootaariyaha, ama qof afhayeena, kana codso karraaniga inuu dacwadda kuu xareeyo. Karraanigu wuxuu buuxin doonaa warqadda qofka loogu yeeri wuxuuna kuu samayni taariikhda udanbaysa ee dhegaysiga wakhtiga maxkamaddu ogolaato. Dhegaysiga udanbeeya ee kiiska dhibka waa in laqabto muddo ku siman 21 maalmood oo ka bilaabanta wakhtiga dacwadda la xareeyay.

Eedeeyuhu sidoo kale waa inuu buuxiyo Xaashada Warbixinta Adeega taa soo ku saabsan sida eedaysanaha loo heli karo iyo wixii waraaqo dacwadda loogu geyn lahaa ama amar maxkamadeeda. Eedeeyuhu waa inuu soo celiyo Xaashada Warbixinta Adeega ayada iyo warqaddii dacwadda una keeno karraaniga.

Arrinta ku saabsan dhinaca dacwadda dhibka eedeeyuhu wuxuu haystaa ilmo yar, eedaysanuhu waa waalidka mid kamida carruuurta eedeeyaha, welina majirto amar hore oo ku saabsan ilmo caawin, eedeeyuhu sidoo kale waa inuu buuxiyo Caddaynta Ilimo Caawinta inta ka horeysa dhegaysiga udameeya.

Ka dhig adeega mid u haybaysan sida ku cad qodobka III(H) ee hoose, "Adeega Dacwadda iyo Xaashadaha la xiriira. "

F. Caawimaadka la heli karo. Waxyaabo lagaa caawini karo ayaa jira si amarka ilaalinta hore ama dhegaysiga maxkamadda, iyada oo lafiirinayo inaya tahay dacwaddu mid ku saabsan xadgudub ama handadaad. Eedeeyuhu waa inuu isku diyaariyo inuu codsado taageero go'an oo ku haboon hadba xaaladda isaga ama iyada haysata kuna qoro hoos.

Kiiska ah sixun ula dhaqmid/xadgudub, amarka ilaalintu wuxuu noqon karaa:

- Amar in eedaysanuhu ka fogaato u hanjabidda, ku xad gudubka, falxun suubin,
- fara xumeyn, weerar ama dhib ugaysi ilmo yar yar oo la degan eedeeyaha;
- Ka mama nuuc eedaysanaha inuu xoog isticmaalo lid ku ah eedeeyaha.
- Si gaara in loo siiyo lahaasho qoyska degaan kaa midka mida (ama heshiis ahaan in amar mid kood la siyo inuu meelka le dejiyo ka kale);
- Ka mam nuuc eedaysahnaha inuu soo galo degaanka eedeeyaha;
- Ka mam nuuc eedaysanaha inuu helo ama haysto wax huba ama wax kale oo khatar ah;
- Amar in dhinacyadu qaybsadaan wixii alaab iyo hanti u dhexaysa;
- Sii xilka ilmaha yar hayntiisa ku meel gaarka ah iyo xuquuqda soo booqashada ilmaha yar;
- Amar bixinta ku meel gaarka ah ee taageerida ilmaha midka mida labada dhinac, ama

ilma kaste oo ku jira ilaalinta dhinacyada;

- Amar in dhinaca kale siiyo dawladda dhexe taageerada ilmaha;
- Weydii eedaysanaha inuu helo cid la talisa;
- Amar eedaysanaha inuu soo afjaro wixii siyaasad caymiska nolosha ku saabsanaa ee ahaa nolosha eedeeyaha.

Intaa waxa dheer, labada kiis ee ah xadgudub iyo handadaad/qalqal galin amarka ilaalintu wuxuu noqon karaa:

- Ka mamnuuc ama xadaynta eedaysanahu inuu la yeesho wax xiriira, sitoosa iyo si dadban mina dhinaca eedeeyaha iyo wixii carruura kuwa ayaga dartoon dacwadda loo soo gubiyay. La xiriir toosa waxaa looga jeedaa( in si mm layskula xiriiro waxaana ku jira mana xaddidna qof ahaan layskula kulmo, in telefon lagu waco,waraaqo iyo warqad-xasuusin ah, fariin e-mail ah,iwm) oo toosa eedaysanuhu ula yeesho eedeeyaha. La xiriirka aan waa sida dadaalkaste oo eedaysanuhu sameeyo si uu ula xiriiro eedeeyaha unu sii maro dadkale(sida inuu fariin ugu dhiibo ama warqad ama e-mail ku socda eedeeyaha);

- Amara eedaysanaha inuu ka fogaado u hanjabidda, ladagaalanka, fara ceeb ugaysiga, xumaynta, weerarka, amaba dhibidda eedeeyaha;
- Ka mamnuuc eedaysannuhu inuu soo galo degaanka eedeeyaha;
- Ka mamnuuc eedaysanaha inuu soo daba galo eedeeyaha, ama ka soo ag dhawaado ama uyimaado meel u dhaw guriga eedeeyaha, iskuulka, ganacsiga ama meesha shaqada, ayada aanay jirin sabab cad;
- Amarto eedaysanaha inuu qaadan, kharibin ama burburin hantida eedeeyaha;
- Amarto inuu bixiyo wixii magdhaw lacageeda siiyana eedeeyaha khasaaraha ka soo gaadhay dhibka iyo fara xumaynta tooska ah;

- Amarto mid ama labada dhinacba inay bixiyaan kharashki maxkamadda ama wixii qarash afhayeena ee macquula;

Mid kaste oo ka mida labada kiis, amarka joogta ah ee ugu danbeeya ee ilaalint waxaa ku jiri kara wixii amaro kale ee siyaado ah ku waas ay maxkarnadu u arkayso lagama maar maan ama ku haboon.

Inta cadwadda la buuxini, dhibanunu waa inuu weydiiyo dhammaan taageerada uu rabo/ ay rabto.

Ogow: Haddii maxkamaddu bilawdo amarka ka ilaalinta sixun ula dhaqmid/xadgudub, haysashada eedaysanaha ee hubku waa xad gudub ka duwan danbigaas oo labada xeer ee ah ka dhexe iyo ka Gobolkaba waa haddii amarka ay ku jirto mid ama labada soo socda:

- Helida in eedaysanuhu ku hayo cabsi amaanka jidhka eedeeyaha ama ilma yar;
- Amar ka mamnuuca eedaysanuhu inuu adeegsado, ama ku hanjabo adeegsiga xoog lid ku ah eedeeyaha ama ilma yar;

- Amar ka mamnuca eedaysanuhu in la dagaalamo, weeraro ama dhibo eedeeyaha ama ilma yar.

Intaa waxa dheer, waalidka si ukula kac ah u isticmaala arinta hab socodka ilaalinta dhinaca sixun ula dhaqmid/xadgudub si uu uhelo xeelad ku saabsan furitaanka ama talaabo waalidnimo maxkamaddu waxbay ka soo qaadi doontaa arinta furitaanka ama waalidnimada markay go'aaminayso heerka xuquuqda iyo mas'uuliyada waalidnima.

G. Amarka Ilaalinta Ku meelgaar ka ah. Eedeeyaha ku jira khatar toosa oo dhiba ama handadaad/qalqal galina wuu codsan karaa amarka ilaalinta ku meel gaar ka asagoo fiirinaya sabduqa ku haboon ee xaashada dacwadda. Ka hor saxeex dadwada qofka karraaniga ah, nootaariyaha, ama afhayeen. Kadib karraanigu wuxuu xeer ilaaliyaha u soo gudbindoonaa wareqada dacwadda iyo arjiga codsiga amarka ilaalinta ku meel gaarka marka mid uu diyaar yahay. Eedeeyuhu waa inuu maxkadda dhexdeeda ku sugu xeer ilaaliyuhu intuu imanaayo. Haddii xeer ilaaliyuhu iman waayo halkaa, karraanigu wuxuu samayndoonaa diyaarino kale. Kuni waxay noqon karaan inaad maxkamad kale aado ama adeegsato telefono ama faakis mashiino siaad u hesho flirinta cabashadan. Eedeeyuhu waa inuu sifiican uraaco tilmaamaha karraaniga ee kiisaskan.

Haddii xeer ilaaliyuhu ku qanacsanyahay cabashooyinka ku qoran dacwaddu inay caddayn karayso amar ku meel gaara, xeer ilaaliyuhu wuu saxeexikaraa amarka. Arinta kiiska ku saabsan sixun ula dhaqmid/xadgudub, haddii xeer ilaaliyuhu ku qanci waayo ama uu hayu su'aal ku saabsan cabashooyinka ku jira dacwadda, xeer ilaaliyuhu wuxuu waraysan doonaa eedeeyaha. Haddii labixiyo, amarlii ilaalinta ku meel gaarku wuxuu ahaan doonaa mid shaqeeya illaa inta ay ka dhacayaan midka mida arimahan soo socda: Amarka Ilaalint ee udambeeya inta looga gaynayo edaysanaha; amar bedelaya amarkii hore ee ku meel gaarka haddii la bilaabo; amar soo afjaraya amarkii ku meel gaarka ahaa haddii la bilaabo. Eedeeyuhu waa inuu maxkamadda horyimaado taariikhda dhegaysiga u dambeeya. Kiiska ku saabsan sixun ula dhaqmid/xadgudub, amarka ka ku meel gaarku wuxuu sitoosa ugu sheegi doonaa eedaysanuhu inuusan haysan karin wax huba ama wax aalad dilaa ah(sida midida), haddii dacwaddu ay muujiso in sixun ula dhaqmid/xadgudub ay kujirtay adeegsiga hub ama alaalad dilaaya, ama tusayso khatar sare oo ah dhib toos ku ah eedeeyaha ama ilma yar. Amarka ku meel gaarku wuxuu eedaysanaha ka mamnuuci haysashada hub ama aalad dilaaya. Amarku wuxuu cadayn doonaa waxa uyahay hubka mamnuuca ahi. Eedaysanaha waxa ka mamnuuca haysashada hub ama aalad dilaaya ama wixii hub dilaaya waa in lagu wareejiyo sarkaalka xeer fulinta ama qofkaste oo wakhtigaa lagu xusan amarka ku meel gaarka ah (24 saac ama in kayar gudaheeda kana bilaabanta kadin inta war qadda amarka loo geeyayn eedaysanaha).

Taageerada jirata ee ku saabsan amarka ilaalinta ku meelgaarku weyka badantahay tan ka jirta dhinaca amarka ilaalinta ee la soo saaray ka dib inta eedaysanaha loo geeyay ogeysiiska dhegaysiga.

Kiiska ku saabsan sixun ula dhaqmid/xadgudub, amarka ku meelgaarku wuxuu noqonkaraa:

- In si go'an oo ku meelgaara loo siiyo xaqqa waalidnimo iyo haynta carruurta, iyo
- In laga dalbo eedaysanuhu inuu ku wareejo wixii huba sarkaalka xeer fulinta ama qof saddexaad.

Labada kiis ee ah sixun ula dhaqmid/xadgudub ama faraxumeyn, amarka ku meel gaarku wuxuu ka:

- Mamnuuci eedaysanaha inuu la yeesho xiriir toosa iyo mid aan toos ahayn eedeeyaha ama ilma yar;
- Mamnuuci eedaysanaha inuu xayiro xoriyadda eedeeyaha;
- Mamnuuci eedaysanaha inuu u hanjabo, la dagaalamo, weeraro, ceeb ugeysto, fara xumeeyo amaba wax u dhimo nabad gelyada eedeeyaha;
- Mamnuuci eedaysanaha inuu soo galo degaanka eedeeyaha;
- Mamnuuci eedaysanaha inuu soo dabagalo eedeeyaha ama ilma yar,ama aado guriga eedeeyaha, meesha shaqada, iskuulka, sabab cad la'aan, kana
- Mamnuuci edaysanaha inuu qaato, kharibo ama burburiyo hantida eedeeyaha.

Ogow: illaa si cad u u qeexayo amarka ilaalinta ku meelgaarku mamnuucidda isla xiriira labada dhinac amarkani ma mamnuucayo isla xiriir, mar haddii aanu ahay isla xiriirkani mid dhib iyo xumaan leh.

Amarka ku meel gaarka ah waa in loo geeyo eedaysanaha inta amarkni hirgalin. Hase ahaatee, haddii eedaysanuhu uu ku jir ogeysiis runa ee amarka ilaalinta, ku xadgudubku waa dambi warqadda amarka hajirto ama yaanay jirine, caadi ahaan, dacwadda iyo wixii waraaqo laxiriira waxaa la bixiyaa isla wakhtiga amarka ilaalinta. Guud ahaan, maxkamadda ayaa diyaarin doonta gaar siinta amarka ku meel gaarka ah la gaar siini eedaysanuhu meesha u joogo. Si loo deddejo hawshaa, inkaste oo, maxkamaddu ka codsan karto eedeeyuhu inuu wixii waraaqo maxkamadeeda u geeyo waaxda Booliska ama kuwa loo yaqaan Sheriifka xafiiskooda. Eedeeyuhu waa inuu waco waaxda Booliska ama Sheriifka si uu u ogaado in eedaysanaha waraaqahaas loo geeyaya iyo in kale.

Haddi eedaysanuhu uusan joogin Maine, eedeeyuhu waa inuu xil iska saaro gaadh siinta eedaysanaha waraaqahan. Eedeeyuhu waxa laga yaabaa inuu jeclaado inuu telefon udiro hay'adda xeer fulina ee ku haboon ee degmada gobolkaa kale halkaa soo eedaysanuhu deganyahay ama inuu weydiiyo waaxdaas inay gaar siinkaraa Amarka ku meelgaarka, dacwadda, warqadda yeeridda ama wixii waraaqo kale la xiriira. Haddii hay'ada xeer fulintu yeeli-weydo, eedeeyuhu waa inuu weydiisto wixii talo ah ama waanooyuin ah. Hay;ada xeer fulintu way qiyaasi doontaa wixii fii ku baxaysa hawshan, taasoo eedeeyuhu ka mas'uul yahay. Amarka ku meel gaarka ah waa inay cadayso maxkamadda Maine ee ku habooni, iyo, inay tahay mid ku hawl gasha xeerka Maine, gacantana uga dhiibto hay;adda xeer fulinta kale ee gobolka kale.

Eedeeyuhu wuxuu xaq uleeyahay inuu ka codsado maxkamadda iny ku tirto amarka ku meelgaarka ugu yaraan 48 saacadood ogeysiis ah kuna socda eedeeyaha, haddii aanay jirin wakhti intaa ka yar oo xeer ilaaliyuhu dhigay. Haddii eedaysanuhu soo gudbiyo codsiga ah xalinta, waa laqaban dhegaysiga codsigaa.

Mamnuuci edaysanaha inuu qaato, kharibo ama burburiyo hantida eedeeyaha.

Ogow: illaa si cad u u qeexayo amarka ilaalinta ku meelgaarku mamnuucidda isla xiriira labada dhinac amarkani ma mamnuucayo isla xiriir, mar haddii aanu ahay isla xiriirkani mid dhib iyo xumaan leh.

Amarka ku meel gaarka ah waa in loo geeyo eedaysanaha inta amarkni hirgalin. Hase ahaatee, haddii eedaysanuhu uu ku jir ogeysiis runa ee amarka ilaalinta, ku xadgudubku waa dambi warqadda amarka hajirto ama yaanay jirine, caadi ahaan, dacwadda iyo wixii waraaqo laxiriira waxaa la bixiyaa isla wakhtiga amarka ilaalinta. Guud ahaan, maxkamadda ayaa diyaarin doonta gaar siinta amarka ku meel gaarka ah la gaar siini eedaysanuhu meesha u joogo. Si loo deddejo hawshaa, inkaste oo, maxkamaddu ka codsan karto eedeeyuhu inuu wixii waraaqo maxkamadeeda u geeyo waaxda Booliska ama kuwa loo yaqaan Sheriofka xaffiis kooda. Eedeeyuhu waa inuu waco waaxda Booliska ama Sherifka si uu u ogaado in eedaysanaha waraaqahaas loo geeyaya iyo in kale.

Haddi eedaysanuhu uusan joogin Maine, eedeeyuhu waa inuu xil iska saaro gaadh siinta eedaysanaha waraaqahan. Eedeeyuhu waxa laga yaabaa inuu jeclaado inuu telefon udiro hay'adda xeer fulina ee ku haboon ee degmada gobolkaa kale halkaa soo eedaysanuhu deganyahay ama inuu weydiiyo waaxdaas inay gaar siinkaraa Amarka ku meelgaarka, dacwadda, warqadda yeeridda ama wixii waraaqo kale la xiriira. Haddii hay'ada xeer fulintu yeeli-weydo, eedeeyuhu waa inuu weydiisto wixii talo ah ama waanooyuin ah. Hay;ada xeer fulintu way qiyaasi doontaa wixii fii ku baxaysa hawshan, taasoo eedeeyuhu ka mas'uul yahay. Amarka ku meel gaarka ah waa inay cadayso maxkamadda Maine ee ku habooni, iyo, inay tahay mid ku hawl gasha xeerka Maine, gacantana uga dhiibto hay;adda xeer fulinta kale ee gobolka kale.

Eedeeyuhu wuxuu xaq uleeyahay inuu ka codsado maxkamadda iny ku tirto amarka ku meelgaarka ugu yaraan 48 saacadood ogeysiis ah kuna socda eedeeyaha, haddii aanay jirin wakhti intaa ka yar oo xeer ilaaliyuhu dhigay. Haddii eedaysanuhu soo gudbiyo codsiga ah xalinta, waa laqaban dhegaysiga codsigaa.

H. shaqada dacwada iyo warqadaha la xiriira. xaalada hadii aan wax ku meel gaar ah la ogolaan, eedeeyuhu isaga ayaa masuul ah inuu habeeyo dacwada, eedeymaha iyo warqaha la xiriiro eedeysanaha . karaaniga markuu dhameyo qoraalka dacwada wuxuu siin doonaa sedex nuwul eedeeyuhu, sedexda nuqul ee dacwadu iyo wixii warqado ah ee la xiriira, iyo hal nuql oo wah warqada shaqada war-gelinta. eedeeyuhu waa inuu reebtaa hal nuqul, iyo hal nuqul oo ah dacwada iyo warqadaha la xiriira. eedeeyuhu waa in uu waraaqaha kale oo dhan u geeyaa booliska ama waaxda shariifka waana inuu weeydiistaa in eedeeysanaha sida ugu dhaqsaha badan loo gaarsiiyo. booliiska ama waaxda shariifka waxaa laga yaabaa inay jirto lacag lagu qabto shaqada oo uu mas'uulka yahay eedeeysanaha. xaaladaha qaarkood waxaa laga yaabaa in maxkamadu ay cafiso lacagta fiiga shaqada.

Hadii eedeysanuhu uusan Maine joogin, eedeeyuhu waa inuu habeeyaa shaqo meesha uu eedeysanuhu joogo. eedeeyuhu waa in uu la xiriiraa hay'ada sharci fulinta meesha uu joogo eedeysanaha si uu u codsado waxka qabashada arinta la xirirta sharciga Maine.

I. Hadii eedeeyuhu uu maskaxdiisa bedelo. hadii eedeeyuhu go'aansado inuu joojiyo dacwada ka hor maalinta dacwad dhageysiga, iyada/isaga waa inuu la socodsiiyo karaaniga maxkamada sida ugu dhaqsaha badan. karaanigu wuxuu weeydiin doonaa eedeeyuhu inuu soo qoro joojinta dacwadiisa. xaakimka waxaa laga yaabaa inuu codsado inuu la hadlo eedeeyaha inta uu san dacwada xirin.

J. Dhageysiga ugu danbeeya. eedeeyuhu waa inuu joogaa dhageysiga ugu danbeeya. dhageysiga kama danbeeyska ah wuxuu nogon doonaa mid dadweeynaha u fasaxanyihiin. Eedeeyuhu isaga ayaa mas'uul ka ah inuu xusuusto maalinta ugu danbeysa dhageysiga hadii xaalad deg-deg ah ay la gudboonaato waa inuu sida ugu dhaqsaha bdan ula soo xiriiraa maxkamada hadii uu eedeeyuhu imaanin waxeey u badan tahay in kiiska halkaa lagu xiro. Xaakimka ayaa go'aansandoono in dacwada la wadaayo iyo in kale.

Dhageysiga, Eedeeyuhu waa inuu cadeeyaa in la xumeeyaya isaga ama caruurtiisa. Hadii ay arintu ku timid caruur oo uusan waalidka waxba ka ogeyn caruurta ayaa la weeydiindoonaa ineey halkaasi ka qirtaan.waana inuu la yimaado marqaati kale oo cadeeya arinka, eedeysanuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu qareen qabsado eedeeyuhuna wuxuu keensankaraa saaxibadiisa iyo kuwa ka hortaga qalalaasaha maalinta dhageysiga.

Eedeysanuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu helo ogeysiis maalinta dacwada la dhageeysanayo . eedeysanuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu helo qaren,wuxuuna keensankaraa marqaatiyaal cadeynaya in uusan danbiila aheyn.hadii uusan eedeysanaha joogin waxaa laga yaabaa in uu xaakimku go'aamiyo inuu yahay danbiile xaakima marka horey wuxuu marka hore dhageysanayaa dhibahana iyo marqatiyaashiisa wixii hadal joojin ahna isga ayaa sameynaya. eedeysanuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu jawaab ka celiyo waxa lagu eedeeya. labada dhinacba waxeey xaq u leeyihiin ineey iska miisaamaan waxa leeys weeydaarsaday iyo marqaatiyaashaba, Laakiin xaakinka ayaa go'aansanaya sida loo sameynayo. markii dacwada iyo marqaatiyaasha la dhageysto xaakimka ayaa gaaray go'aanka.

Kiiska fara xumeynta, hadii eedeeyaha iyo eedeysanahaba ay yihiin waalid caruur waa iney labadoodaba saxiiraan xuquuqda dhaqaaleynta caruurta inta aan dacwada la dhageysan, waxaana laga yaabaa in uu xaakimka wareeysto labadoodaba dhaqaalaha soo galo.hadii la xukumo ilaalin xaakimka wuxuu dalbayaa xuquuqda dhaqaalaha ilmaha.

dhageysiga kama danbeysiga ah, dhiabanuhu waa inuu diyaarsadaa dacwadiisa. hadii uu eedeeyuhu doonayo mag-dhow dhaqaale, eedeeyuhu waa sheegaa inta ay mag-dhawgu la egyahay waxa ka baxay iyo waxa soo galay.

K. Amar dhageysi la'aanwaxaa la yaabaa inuu xaakimka weeydiiyo iyadoon dacwad la dhageysan in la qirto danbiga. Ilaalinta kama danbeysta ah. ilaalinta kama danbeysta ah waxaa laga yaabaa ineey gaarto ilaa laba sano hadii kiisku yahay fara xumeyn, ama

halsano hadii ay tahay xumeyn. ilaalin kast weey jireeysaa ilaa la helo amar burinaayo ama uu waqtigeeda dhamaado. Xusuus: maxkamada oo kaliya ayaa bedeli karta amarka. amarka wuxuu cadeynayaa waxa eedeysanaha laga reebay inuu sameyo iyo wuxuu sameynkaro. hadii eedeysanuhu ku xad gudbo amarka eedeeyuhu waa inuu wacaa booliska una sheegaa inuu eedeysanuhu ku xad gudbay amarka.Eedeeyuhu waa inuu heystaa maarka mar kasta

M. hadii eedeeyuhu uu doonayo in amarka la bur-buiryo ama la bedelo. hadii eedeeyuhu uu doonayo in amarka la bur-buiryo ama la bedelo, eedeeyuhu waa inuu qoraal geeyaa oo lagu beldelayo ama lagu baa'bi'inayo amarka. karaaniga ayaa siindoono eedeeyaha waqtiga iyo saacda la baabi'inayo amark. eedeysanuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu joogo mark ala bedelayo amarka uuna ka jawaabo. dhageysiga bedelida amarka waxeey la hab thay III(J) ee kore, laguna magacaabo "dhageysiga ugu danbeeyo."

N. hadii uu eedeeyaha doonayo in loo kordhiyo ilaalinta. ilaalinta waxaa la socoto waqti ay dhamaato. ilaalinta faraxumeynta waxaa ugu badan labasano, ilaalinta xumeyntana waxaa ugu badan halsano. hadii eedeeyuhu aaminsanayahay in kordhintu tahay muhiim, eedeeyuhu waa inuu xareeyaa kordhin. si looga hor tago khatar waa inuu eedeeyuhu xareyaa mudo ka hor 30 casho inta aysan dhicin amarka ilaalinta. dhageysigan waa qodobka III(H) iyo III(J) ee kore.

## IV. SIDA EEDEYSANUHU UU ISKU DIFAACI KARO

Eedeeysanuhu wuxuu xaq u leeyhay inuu is difaaco, uuna keeno wax kasto oo cadeyn karo inuu san aheyn danbiile ka hor dhageysiga dacwada kamadanbeeyska ah.

Eedeeysanaha wuxuu xaq u leeyahay in uu helo nuqul dacwada uu eedeeyuhu ku soo oogay, si kastaba arin ka ahaatee hadii eedeysanuhu uu ku xad gudbo amarka maxkamada waa danbi. eedeysanauhu wuxuu xaq u leeyahay in la ogeysiiyo mar kasto oo dacwada la dhageysanayo mudo dhan 48 saacadood, hadii uu san xaakimka gooynin waqti intaas ka yar.

Ogeysiis: hadii eedeysanuhu uu aamin sanyahay inuu eedeeyuhu sumeeyay ama faraxumeeyay waa inuu xareeyaa dacwad gooni ah.

A. Hadii amar ku meel gaar ah la go'aamiyo: markii uu maro eedeysanaha amarka la siiyaya, eedeysanaha wuxuu maxkamada qoraal ugu gudbinkaraa in amarkaasi la baa'biyo. eedeysanahu wuxuu xaq u leehayay in 48 saacdoood oo ogeysiis ah la siiyo eedeeyaha, hadii uu san xaakimka gooynin waqti intaa ka yar. eedeysanahu waxaa la siin doonaa waqti iyo saacad. hadii eedeeyuhu oo yahay adreskisa mid qarsoon, karaaniga ayaa habeyndoona howsha. inta howsha lagu jiro waxaa la soo xiriiri doono dhibanah sargaal ka tirsan waaxda shariifka.

B. Dhageysiga kama danbeeysta ah: eedeeysanuhu waa inuu si qoraal ah ugu jawaabaa dhabaan waxa kordhinta ka ilaalinta faraxumeynta iyo xumeynta sida lagu qeexay sharciga qeeybta III(F) ee kore. eedeysanahu waa inuu fiiriyaa codsiga eedeeyaha iyo

xiliga dhageysiga iyo sharaxaada iyo muhiimada iyo sida ay ugu haboontahay,iyadoo lagu saleynayo labada dhinac' xaalaadooda iyo xaaladao caruurtooda hadiiba ay jiraan.

C. amar la bixiyay iyadoon qofna ogalaan xaakimka waxaa laga yaabaa inuu weydiiyo in la qirto amarka , inta ay arintu noqon laheysd in la dhageysto. amarka waxaa la bixin karaa iyadoon la fiirin in eedeeyuhu uusan gelin danbiga faraxumeynata ama xumeynta arinkana waxaa loo gudbindoonaa waaxda nabadagalyada hadii uu ku had gudbana waxeey noqon doontaa xabsi iyo $2,000 oo ganaax ah. xaaladaha qaarkood kiisaska waaweeyn, (24 saacadood ama ka yar markuu dhameysto eeddeeysanuhu ). kiiska waxaa laga xareynkaraa maxkamada ama booliiska. hadii arintu ay ku lug leedahay qori, maxkamadu waxey amri kartaa in la raadiyo.

Ogeeysiis: hadii maxkadamadu amarto ka ilaalin hub ku xad gudubka shacrigan wuxuu noqonayaa danbi dowlada guud iyo mida gobalkanba waxaana la socodn doono arimahan:

- in la fiiriyo in eedeysanuhu ay macquul tahay inu waxyeeli karo jir ahaan nabadgalyada eedeeyaha, ama canuga eedeeyaha
- waxaa ka mamcuun ah eedeysanaha inuu is ticmaalo hanjabaad inuu xoog u isticmaalo eedeysanaha
- amarka wuxuu mamnuucayaa in eedeysanaha uu weeraro ama uu fara xumeeyo dhinahanba ama cayaalkiisa

Waxaa dheeraad ah, in uu waalidka isticmaalo amarka si uu ku helo faa'ido furiin ama faa'ido doonnimo.

E. hadii is difaachuhu uu doonayo in marka la bedelo ama la baabi'iyo: hadii is difaachuhu uu doonayo in marka la bedelo ama la baabi'iy, deedeysanauhu waa inuu qoraal u gudbiyaa karaanida maxkada. waa la bedelikaraa amarka hadii uu eedeysanuhu tusiiyo xaalad macquul ah.

F. hadii eedeeyuhu uu doonayo inuu kordhisto amarka ilaalinta: amarka ilaalinta waxaa lagu dari doonaa taariikh uu dhacayo. waqtiga ugu badan ee amarka ilaalint afaraxumeynta waa labasano. waqtiga ugu badan ee amarka ilaalinta xumeyntana waa halosano. dhiabanauhu waa inuu maxskadmda ka xareeyaa qoraal oo ku dalbanayo mudo dheeraad ah, karaaniga ayaa balamn dhageysi qabandoono. eedeeysanuhu wuxu xaq u leeyahay in qoraal nuqul ah la siiyo. eedeysanuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu joogo dhageysiga kordhinta amarka uuna ka doodo kordhintiisa, iyadoo la raacayo habka kor ku xusan